

Dhirta iyo manaafacaadkooda (2)

Om planter og deres nytteverdi



Sawirka 1aad. Xogasho: Pixabay.com

Qaybaha cunatada ee jirkeenu u baahan yahay waxaa ka mid ah Kaarboohaydataytka (carbohydrates), borootiinka (proteins), baruurta (fet), fitamiinada (vitamins), macdanta (minerals), iyo waxyaabo kale oo soo raaca. Kuwaas oo dhamaantood laga maarmaan ah, si looga helo tamarta, ama quwada aynu ku socono iyo koritaanku qofku korayo.

Sadexda ugu horeeya waxaa loo yaqaanaa nafaqo (nutrients). Halka qaybaha kale ee vitamiinada, macdanaha, iyo biyaha, iyaguna waa muhiin, waxayna jidhka qofka kacaawiyaan inuu si habsami ah u shaqeeyo.

Haydariij-kaarboon (Hydrokarbon) Waa isku dhafka curiyayaasha kala ah karbon (C) iyo Hydrogen (H), iwm. Kuwaas oo ah curiyaasha ubucda u ah samaysanka saliida ceeydhiin iyo gaaska dabiiciga ah oo ah khayradka dabiiciga ah ee ku jira dhulka hoostiisa. Isku dhafka labadaas curiye waxaa looga qiyaas qaataa tayada iyo baaxada inta shiidaal ama gaas ah ee

Planter: Somali

dhulka hoostiisa ku jira. karbohydratesku waa waxyaabaha jidhkeenu ka helo kulka iyo tamarta aynuna ku soconayno.